# Xuquuqahaaga iyo Ilaalinadaada Ka Dhanka ah Lacagaha Caafimaad iyo Kharash Dalicidda Baaqiga ee Lama Filaanka ah ee Gobolka Washington

*Marka aad hesho daryeel xaalad degdeg ah ama aad daaweyn ka hesho bixiye shabakadda ka baxsan oo ku sugan isbitaal shabakadda dhexdeeda ah ama xarunta qalliinka bukaan socodka, waxa aad lagaa ilaaliyay kharash dalicidda ama kharash dalicidda hadhaaga eelama filaanka ah.*

## Waa maxay "karash dalicidda hadhaaga" (mararka qaar loo yaqaano "kharash dalicidda lama filaanka ah")?

Marka aad aragto dhakhtar ama bixiye daryeel caafimaad oo kale, waxa dhici karta in lagugu yeesho kharashaad aad jeebka ka bixiso oo gaar ah, sida kharash wada bixin, kharash wada bixin caymis, iyo/ama kharashka la bixiyo caymiska kahor. Waxa dhici karta inaad yeelato kharashaad kale ama ay noqoto inaad bixiso kharashka oo dhan haddii aad aragto bixiye ama aad booqato xarun daryeel caafimaad oo aan ku jirin shabakaddaada qorshaha caafimaadka.

"Ka baxsan shabakadda" waxa ay ka dhigan tahay bixiyeyaasha iyo xarumaha aan heshiis la saxeexin qorshahaaga caafimaadka. Bixiyeyaasha shabakadda ka baxsan waxa dhici karta in loo ogolaado inay kugu soo dallacaan kharashka dheeraadka ah ee u dhexeeya kharashka qorshahaagu ogolaaday in u bixiyo iyo kharashka dhamayska tiran ee uu soo dallacay adeeggu. Tan waxa loo yaqaanaa "kharash dalacidda baaqiga." Kharashkan waxa ay u badan tahay in uu ka badan yahay kharashaadka shabakadda dhexdeeda ee adeegga lamidka ah waxana dhici karta inaan lagu xisaabin xaddigaaga jeebka ka baxaya ee sannadlaha ah.

"Kharash dalacaadda lama filaanka ah" waa kharashka hadhaaga ee aan la filaynin. Tani waxa ay dhici kartaa marka aanad xakameyn karin cida ku lug leh daryeelkaaga—sida marka aad leedahay xaalad degdeg ah ama marka aad ballan booqasho ka qabsato xarun shabakadda dhexdeeda ah balse si lama filaan ah uu kuu daaweeyo bixiye shabakadda ka baxsan.

Shirkadaha caymiska waxa looga baahan yahay inay kuu sheegaan, iyaga oo adeegsanaya websaytyadooda ama sheegaya marka laga codsado, bixiyeyaasha, isbitaalada, iyo xarumaha ku jira shabakadahooda. Isbitaalada, xarumaha qalliinka, iyo bixiyeyaashu waa inay kuu sheegaan shabakadaha bixiyaha ay ku jiraan iyaga oo adeegsanaya websaytkooda ama sheegaya marka laga codsado.

## Waxa aad ka ilaashan tahay kharash dalacidda hadhaaga ee:

### Adeegyada Xaaladda Degdegga ah

Haddii aad leedahay xaalad caafimaad oo degdeg ah, xaalad caafimaad maskaxeed ama adeegsi daroogo oo aad adeegyo xaalad degdeg ah aad ka hesho bixiye ama xarun shabakadda ka baxsan, inta ugu badan ee bixiyaha ama xaruntu ay kugu dallici kartaa waa xaddiga kharash-wadaaga shabakadda dhexdeeda ee qorshahaaga (sida kharash wada

bixinta iyo kharash wada bixinta caymiska). Kharashka hadhaaga lagugu ma soo dallici karo adeegyadan xaaladda degdegga ah. Tan waxa kamid ah daryeelka aad ka hesho isbitaal iyo xarumo siiya adeegyada dhibaatooyinka dadka maraya xaalad degdeg ah oo caafimaad maskaxeed ah ama cillad adeegsi daroogo ah. Kharashka hadhaaga lagugu ma soo dallici karo adeegyadan xaaladda degdegga ah, oo ay kamid yihiin adeegyada aad heli karto kadib marka aad xaalad deggan ku jirto.

## Adeegyo cayiman oo isbitaal ama xarun qalliin bukaan socodka ah oo shabakadda dhexdeeda ah

Marka aad ka hesho adeegyo isbitaal ama xarun qalliinka bukaan socodka ee shabakadda dhexdeeda ah, bixiyeyaal cayiman oo halkaas ku sugan ayaa waxa dhici karta inay ka baxsan yihiin shabakadda. Xaaladahan, inta ugu badan ee bixiyeyaashani kugu dallici karaan waa xaddiga kharash wadaaga shabakaddaada dhexdeeda.

**Sidoo kale marnaba lagaagama baahanayo inaad daryeel ka hesho meel ka baxsan shabakadda. Waxa aad dooran kartaa bixiye ama xarun ku jirta shabakadda qorshahaaga.**

## Goorta lagaa dalban karo inaad ka tanaasusho ilaalinadaada kharash dalicitaanka hadhaaga:

Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan isbitaalada iyo bixiyeyaasha ambalaaska duula, **marnaba** waajib kaagama dhigi karaan inaad ka tanaasusho ilaalinadaada kharash dalacidda baaqiga.

Haddii kharashka lagaaga bixiyo qorshe caafimaad kooxeed oo is maalgelisa, xaaladaha qaar oo xaddidan, bixiye ayaa kaa dalban kara inaad ogolaato inaad ka tanaasusho ilaalinadaada kharash dalacidda baaqiga, balse **marnaba** waajib lagaaga ma dhigayo inaad bixiso ogolaanshahaaga. Fadlan la xidhiidh loo shaqeeyahaaga ama qorshahaaga caafimaadka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## Marka kharash dalacidda baaqiga aan la ogoleyn, waxa aad sidoo kale leedahay ilaalinada soo socda:

- Keliya waxa aad masuul ka tahay bixinta qaybtaada kharashka (sida kharash wada bixinta, kharash wada bixinta caymiska, iyo kharashka la bixiyo caymiska kahor ee aad bixin lahayd haddii bixiyaha ama xaruntu ay ku jiri lahayd shabakadda dhexdeeda). Qorshahaaga caafimaadka ayaa si toos ah u siin doona kharashka bixiyeyaasha iyo xarumaha ka baxsan shabakadda.
- Qorshahaaga caafimaadku guud ahaan waa in uu:
    - Bixiyaa kharashka adeegyada xaaladda degdegga ah isaga oo aan kugu waajibinayn inaad ogolaansho u hesho adeegyada oo qaddin ah (ogolaansho hore).
    - Bixiyaa kharashka adeegyada xaaladda degdegga ah ee ay bixiyaan bixiyeyaasha shabakadda ka baxsan.
    - Iyada oo laga duulayo waxa uu kugu leeyahay bixiyaha ama xarunta (kharash wadaaga) waxa la siin lahaa bixiye ama xarun shabakadda dhexdeeda ah oo lagu muujiyay xaddigaas sharaxaadda gunnooyinkaaga.
    - Ku xisaabiyaa wixii xaddi ah ee aad ka bixiso adeegyada xaaladda degdegga ah ama adeegyada shabakadda ka baxsan kharashka aad bixiso caymiska kahor ama xaddigaaga jeebka aad ka bixinayso.

**Haddii aad aaminsan tahay in si khaldan kharashka laguugu soo dallacay**, waxa aad ugu xareyn kartaa dacwad dawladda federaalka barta https://www.cms.gov/nosurprises/consumers

ama adiga oo wacaya 1-800-985-3059; oo/ama waxa aad dacwad ugu xareyn kartaa Xafiiska Gobolka Washington ee Guddoomiyaha Caymiska websaytkooda ama adiga oo wacaya 1-800-562-6900.

Waxa aad booqataa https://www.cms.gov/nosurprises si aad u hesho macluumaad ku saabsan xuquuqdaada aad ku leedahay sharciga federaalka.

Waxa aad booqataa websaytka Xeerka Ilaalinta Kharash Dalacidda Baaqiga ee Xafiiska Guddoomiyaha Caymiska si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahaaga aad ku leedahay sharciga gobolka Washington.